



LIDA Stories

lidastories.net

**Codka shimbiraha subaxdii /
Lyden av fuglar om morgonen**

LIDA Portugal

☒ Vilnius Aistis Vilimas


☐ Mohamed Abdirashid (so), Espen

Stranger-Johannessen (nn)



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>

**Codka shimbiraha subaxdii
Lyden av fuglar om morgonen**




LIDA Portugal

☒ Vilnius Aistis Vilimas

☐ Mohamed Abdirashid

5

Soomaali / nynorsk



Yulia, ninkeeda iyo gabadhooda yar waxay ku noolaayeen tuulo yar oo xasilloon oo ku taal Ukraine. Yulia waxay aad u jeclayd in subax walba kusoo kacdo dhawaaqa shimbiraha. Marna uma malaynayn inay guri ka fog degi doonto, ama aanay ku toosi doonin dhawaaqa shimbiraha subaxdii.

...

Yulia, mannen hennar og den vesle dottera deira budde i ein liten, roleg tettstad i Ukraina. Yulia likte veldig godt å vakne kvar morgon til lyden av fuglar. Ho trudde aldri at ho skulle bu langt heimanfrå, eller at ho ikkje skulle bli vekt av lyden av fuglar om morgonen.




Ninkeeda ayaa had iyo jeer ka caban jiray in
aanu lacag ku filan hayasanin, wuxuuna bilaabay
inu si aad ah u cabbo khamriga. Waxay
go'aansadeen inay nasiibkooda ku tiijaabiyaan
Portugal. Waxaa laga yaabaa in ay halkaas ka
heli karaan lacag badan si ay guri u dhistaan oo
ay mustaqbal wanaagsan ugu sameeyaan

qoyskooda.

...

Mannen hennar klaga alltid over mangelen på
pengar, og han byrja å drikke mykje. Dei
bestemte seg for å prøve lykke i Portugal.
kanskje dei der kunne tene meir pengar til å
bygge eit hus og ei betre framtid for familien.



Yulia waxay si fiican ula qabsatay gurigeeda cusub, waxayna bilowday inay ka shaqeyso sidii nadiifiye. Macaamiisheeda ayaa runtii aad uga mahadceliyey dadaalkeeda iyo hab-dhaqankeeda wanaagsan. Dhanka kale ninkeeda waxa uu dareemay in laga tagayo. Dhibaataada khamriga awgeed, loo-shaqeeyayaashu ma aaminaan isaga mana siin doonaan shaqo.

...

Yulia tilpassa seg den nye heimen godt, og ho byrja å jobbe som heimehjelp. Kundane hennar sette verkeleg pris på arbeidet hennar og den høflege innstillinga hennar. Mannen hennar, derimot, følte seg stadig meir oversett. På grunn av alkoholproblemet hans stolte ikkje arbeidsgivarar nok på han til å gi han arbeid.

Yulia waxay tagtay hoya haweenka, halkaas oo ay dareentay in ay ka heshay ammaan ka badan intii ay haysatay muddo dheer. Taasi may dareemin tan iyo markii ay subaxdii ku toosi jirtay codka shimbiraha.

...

Yulia drog til eit krisesenter, der ho følte seg tryggare enn ho hadde gjort på lenge. Ho hadde ikkje følt seg sånn sidan ho vart vekt av lyden av fuglar om morgonen.

Maalin maalmaha ka mid ah ayuu bilaabay inuu ku qayliyo Yulia. Dabadeed, wuxuu bilaabay inuu riixo. Qayladii iyo garaacii baa ka sii daray, siiba markuu sakhransanaa. Yulia waxay u baqday nafteeda iyo gabadheda, laakiin ma aysan garanayn waxay samayn karto.

...


Ein dag byrja han å kjefte på Yulia. Seinare byrja han å dytte henne. Valden auka med skriking og slag, særleg når han var full. Yulia var redd for seg sjølv og for dottera, men ho visste ikkje kva ho skulle gjere.



Markii Yulia ugu dambeyntii ay tagtay qolka gargaarka degdegga ah ee cusbitaalka iyada oo gacan ka jaban, waxay u sheegeen in rabshadaha qoysku ay dhibaato weyn ku tahay Portugal. Waxa kale oo ay sheegeen in arrintaasi ay tahay dambi, isla markaana ay tahay inay Booliska wargeliso.

...

Då Yulia omsider måtte dra til legevakta på sjukehuset med brekt arm, fortalde dei henne at partnervald var eit stort problem i Portugal. Dei sa òg at det var ulovleg, og at ho burde melde det til politiet.



Yulia waa ay ku daashay oo ma aysan dooneyn in gabadheeda yar ay ku korto guri ay maalin kasta goobjoog u ahayd rabshad. Yulia waxay ogaatay in calaamadaha xadgudubka ay horay u jireen, xitaa haddii ay qaadatay qaabab badan oo kala duwan.

...

Yulia var utsliten og ville ikkje at den vesle dottera hennar skulle vekse opp i ein heim kor ho var vitne til vald dagleg. Yulia innsåg at teikna på mishandling hadde vore der heile tida, sjølv om dei såg veldig forskjellige ut.